

QAANGAARAHAA AF-INGIRIISIGU LUQADDA LABAAD UU U YAHAY (ESL).

Helidda fasalka ESL ayaa hab fudud ah

TALLAABO 1: WAA MAXAY HEERKAAGA JOOGITAANKA KANADA?

Waan ku soo dhawaynaynaa dhammaan waxbartayaasha qaangaara ah fasalladayada ESL. Haddii aad tahay deggane Kanada fasalladayadu waa lacag-la'aan. Fadlan eeg shuruudaha mutaysiga ee hoos ku qoran.

Degganayaasha Kanada

Si aad ugu mutaysato deggane Kanada ahaan waa inaad noqotaa:

- 18 sano jir ama qof ka wayn, oo aadan ahayn arday dugsi maalin ka qoran dugsi maalin kasta oo dawladdu taageerto kuna yaal Ontario, oo aad noqotaa qof afkiisa kowaad aanu ahayn ahayn Ingiriisi, iyo
- Muwaaddin Kanada (ku dhashay meel ka baxsan Kanada), Deggane Joogto ah, Qaxooti Heshiis ama Sheegte Qaxooti, ama
- Loo Magacaabaha Goboleed ama ku tiirsanahooda, ee loogu oggolaaday marka loo maray Opportunities Ontario (Fursadaha Ontario):
- Barnaamijka Loo Magacaabaha Goboleed ee laakiin aan weli arrimahdooda la habsocodsiiin inay helaan heerka deggenaha joogtada ah, ama
- Shaqaalaha Shisheeye ee Meel Ku Gaadhka ah, ama ku tiirsanahooda, loogu oggolaaday marka loo maray Canadian Experience Class, ama
- Shaqaale Guri Shisheeye loogu oggolaaday hoos barnaamijka Live-In Daryeel.

Haddii aad ugu mutaysan hoostooda qaybaha lagu sifeeyay korka, fadlan tag Tallaabo 2.

TALLAABO 2: HEL DARAJADAADA

MAKA QAYBGASHAY FASAL ESL GUDIHII SANNADKII (12 BILOOD) LA SOO DHAAFAY?


MAYA

Fadlan kala xiriiir Xarunta Qiimaynta iyo u Gudbinta YMCA lambarka **416.925.5462** si aad u qabsato ballanta qiimaynta luqadda. Waxaad u baahan doontaa inaad tusto caddayn deggenaansho; kaliya mid ka mid ah dokumentiyadan soo socda ayaa la aqbali doonaa:


- Kaarka Degganaanshaha Joogtada
- Qirashada Ujeeddada Sheegashada Heerka Qaxootinimo
- Dukumentiga Sheegtaha Qaxooti Ahaanta
- Heerka Qaxooti Ahaanta Heshiika
- Kaarka Muwaddiniimada Kanada
- Baasaboorka Kanada
- Oggolaanshaha shaqada iyo warqad muujinaysa u oggolaanshaha Opportunities Ontario: Barnaamijka Loo Magacaabaha Goboleed
- Warqad Xaqiijinta laga helay Citizenship and Immigration Canada oo xaqiijinaysa u ansixinta Deggenaanshaha Joogtada ah
- U Oggolaanta Shaqada Daryeel-bixye La-Noolan ahaan oo ay bixisay Citizenship and Immigration Canada

Ballamaha waxa la heli karaa inta lagu jiro maalinta, fiidanka iyo maalmaha Sabtida iyo Axadda, fadlan ka fiiri goobaha hoos ku qoran. Marka la qiimeeyo arrimaha, qiimeeyahaaga ayaa adiga ku qori doona mid ka mid ah (ama in ka badan) fasalladayda. Waxay kuu daabici doonaan Foomka u Gudbinta Koorsada oo aad ugu baahan doonto inaad keento maalinta ugu horraysa ee fasalka. Haddii aad u baahan tahay caawin wakhti kasta kaddib markaad ka tagto xarunta YMCA ama aad rabto inaan ballan kuugu qabano qiimaynta luqadda adiga, fadlan ka soo wac xafiiskayaga lambarka **416.338.4300**.


YMCA Assessment and Referral Centres




20 Grosvenor Street, 3rd Floor



1530 Albion Road, Unit 83 (inside the Albion Centre)



4580 Dufferin Street 2nd Floor



10 Milner Business Court, Suite 600



251 Consumers Road, Suite 110

MAKA QAYBGASHAY FASAL ESL GUDIHI SANNADKII (12 BILOOD) LA SOO DHAAFAY?

HAA

Si aad u hesho liiska goobaha iyo heerarka ku aaddan fadlan kala xiriir xafiiskayaga dhexe lambarka **416.338.4300** ama booqo bartayada internetka ee www.ESLtoronto.ca. Fadlan diyaarso lambarkaaga tixraaca. Ama haddii aad hesho goob leh heerkaaga qiimaynta luqadda waxaad tagi kartaa goobtaas oo aad keeni:

Dokumentiyadaada Socdaalka **iy**o aqoonsi sawir leh iyo midkood;

- lambarkaaga tixraaca ardayga (lagugu siiyay inaad imtixaankaagii qiimaynta) ama
- foom u gudbin koorso ka yimid fasalkaagii ugu dambayey

Booqdeyaasha

Haddii aad booqanayo Kanada ama halkan aad ku timid fiise arday fiisaha, waxaad ugu biiri kartaa barnaamijkaayaga ESL ee Booqdaha adiga oo bixiya \$7 saacad waxbarid kasta oo fasalka, oo ay ku jirto canshuurtu. Waa inaad isqorto ugu yaraan labo toddobaad oo aad bixiso khidmad qiimayn bilow ah \$60 kahor inta aadan fasalka ka qaybgelin. Qiimaynta ayaa lagu qabtaa xarunta (777 Bloor Street West), keliya ballan qaadasho. Wac lambarka **416.393.0532** si aad u heshid macluumaad dheeraad ah. Waxaan aqbalnaa lacag kaash ah, biximaha money order, jeegagga diiwaangashan oo lagu qorayo siinta: Toronto District School Board (Guddoonka Waxbarashada Degmada Toronto). Lacagaha khidmadda koorsadu waa ma-soocelin.